

Hel daryeel adiga oo aan ka tagin gurigaaga



Qorshaha Caafimaadka Oregon wuxuu daboolaa fiidiyo, taleefon, iyo blamaha onleenka

Waxaan dhammaaneen sameyneynaa qeybteena aan guriga ku joogno oo aan nololo badbaadino inta lagu jiro gurmada COVID-19. Hadeer, waxaad dajin kartaa balamaha, lahadal bixiyayaashaada, oo hel daryeel adiga oo aan gurigaaga ka tagin. Waa bilaash. Ku weydii bixiyahaaga fiidiyo, taleefon, ama balanta onleenka. Waxaad noqon kartaa bukaan cusub pp aad weli ka heleysaa daryeel guriga.

Waan ognahay in qof walba uu helayo fiidiyo ama intarneet. Fadlan kala hadal dhaqtarkaaga ama bixiyayaasha kale wax ku saabsan waxa adiga kuu shaqeynayo. Waxaad sidoo kale weydiin kartaa hay'ada daryeelkaaga la xiriiriyay (CCO) caawin. [Hel warbixinta xiriirka qorshahaaga CCO](#). Miyaadan haysan taleefon? [Qadka noloshu Oregon ayaa ku caawin karo](#).



Helida daryeelka waa bilaash. Waxaad u heli kartaa inta badan daryeelkaaga joogtada ah qaabkaan, sida baaritaanada, daaweynta, ama adeegyada la gaarsiyo faca. Laakin bixiyahaaga wuxuu u baahan karaa inuu qaabilo degdegyadaan marka koowaad.



Waxaa kuu suurto galeyso inaad isticmaashid sheekada fiidiyaha, fariin qoraalka ama i-meelka, wacitaanada taleefonka, ama bogga onleenka. Kala hadal bixiyahaaga waxa adiga kuu shaqeynayo.



Ma u baahantahay turjubaan ama caawin luuqad ama qaab kale? U sheeg xafiiska bixiyahaaga markii aad sameyneysid balan. Haddii aad u baahantahay caawin badan, soo wac 844-882-7889.



Waxaad kala hadli kartaa dhaqtarkaaga wax ku saabsan walaacyo walba, ama ahan kaliya COVID-19. Fiidiyaha, mobeelka, iyo balamaha onleenka waxaa loogu tallo galay caafimaadka maskaxda, daweynta la qabsiyada iyo ilkaha, sidoo kale.



Weydii farmashiigaaga haddii aad ku heli kartid daawooyinkaaga boosto ahaan. Waxaad sidoo kale weydiin kartaa CCO-gaaga caawin. Haddii aadan laheyn CCO, soo wac 800-273-0557.

Caawinta Loo baahanyahay? Booqo OHP.Oregon.gov ama soo wac 800-273-0557 (TTY 711)

Waxaad ku heli kartaa warqadaan luuqad kale, daabacad balaaran, ama qaab kale oo si wanaagsan kugu haboon. Soo wac 800-273-0557 (TTY 711). [WARBIXINTA LOOGU](#)

TALLOGALAY XUBNAHA OHP | 4/9/20

OHA 2367 (4/2020) Somali